

## Fasaxyada soo socda ee dugsiyada xiliga firaaqada caruurta lagu hayo

Wakhti xaadirkan caruur badan ayaa la diiwaan geliyey in ay dhigan doonaan dugsiya xiliga firaaqada caruurta lagu hayo xiliga fasaxyada lagu jiro. Iyadoo la eegayo xaalada aynu ku suganahay waxaanu idinka codsanaynaa waalidiin ahaan in aynu is kaashano, si ay caruurta iyo shaqaaluhuba u helaan fasax fiican oo nasasho ah.

Waxaanu rabnaa in aan idin xasuusino nidaamka nooga yaalaa markii waalidku/masuulka ilmuhu fasax yahay:

- Caruurta waa fasax marka waalidkood fasax yahay (fasax la qaatay ama fasax jadwalka ugu qoran).
- Hadii labada waalid midkood aanu shaqayn, ama tusaale ahaan waalidnimo fasax ku yahay, isla markaasna waalidkii kale fasax ku jiro markaas oo kale ilmuhuna waa in uu fasax ahaadaa.
- Waa muhiim in aad soo ogeysiiso dugsiya xiliga firaaqada caruurta lagu hayo wakhtiyada iyo maalmaha uu ilmahaagu dhigan doono wakhtiyada fasaxyada lagu jiro.
- Ha ogeysiin soo xaadirista dugsiya xiliga firaaqada lagu hayo caruurta “(si loo habsado)”. Waxaa qorshahayga u sal ah sida loo shaqaynayo hadba intii caruur lasoo sheegay in ay dugsiya xiliga firaaqada imanayaan.
- Hadii uu qofkii waalidka ahaa ku khasbanaado in uu fasaxiisa joojiyo oo shaqadii dib ugu laabto markaas wuxuu xaq u leeyahay in caruurta loo hayo. Wixii isbedel ah sida ugu dhakhsiyaha badan ulasoo socod siiya dugsiya xiliga firaaqada caruurta lagu hayo.
- Markasta cusboonaysii jadwalka saacadaha ilmuhu dugsiya xiliga firaaqada joogayo adigoo adeegsanaya barta lagu wada xidhiidho ee VKlass wixii isbedel ahna sida ugu dhakhsa badan noola soo socodsii. Waa lagama maarmaan taasi hada si aan shaqaale ku filan u hawl gelino dugsiya caruurta lagu hayo xiliga firaaqada, taas oo weliba muhiimad gaar ah leh wakhti xaadirkan.
- Wakhtiyada/saacadaha ay furan tahay dugsiyada wakhtiyada firaaqadu waxaa dhici karta in lasoo yareeyo.